

Takoorka, Kadeedka Takoorka, iyo Kadeedka Kacsiga

Xallinta Muranka

Gobolka Washington, arday kasta waa in uu si siman u heli karo waxbarashada dadweynaha, takoor la'aan. Haddii waalidiinta, ardayda, shaqaalaha dugsiga, ama xubnaha bulshada aaminsan yahiiin in ardayga la kulmay takoor ama kadeedka takoorka, waxaa jira talaabooyin ay qaadi karaan si ay u xalliyaan arrimahaan una u cirib tiraan dabeecadda ama xaaladaha u horseeday arrinta.

Takoorka waa sida aan xaqa ahayn ama sinaan la'aanta loola dhaqmo ama loo kadeedo qof maxaa yeelay wuxuu ka tirsan yahay koox, uu sharciga ku sifeeyo **dabaqad la badbaadiyo**. Dabaqadda la badbaadiyo waa koox dad qeybsada sifooyin ka dhexeeyo oo laga badbaadiyo takoorka iyo kadeedka hoos yimaada sharciga federaalka iyo gobolka.

Kooxahaan waa dabaqaad la badbaadiyo sida uu hoos timaado sharciga Gobolka Washington:¹

Isirka iyo midabka	Doorashada Jinsiga
Asal qaran	Sheegidda jaadka qofka
Diinta iyo waxa la aaminsan yahay	Aqoonsiga jaadka qofka
Jinsiga	Xaaladda ciidamada ka soo noqda dagaalada ama militariga
Itaal darrida	Isticmaalka hoggaaminta eeyga la tababaray ama xoolaha adeegga

Kadeedka takoorka waa kadeedka ku saleysan dabaqadda la badbaadiyo. Waxay qaadan kartaa qaabab badan. Cago jugleynta, caayda, kaftanka xun, weerarka, ama dabeecad kale oo, jir ahaan, dhalisa cabsi gelin, waxyeelo, ama yasniin ayaa ah xoogaa tusaalooyin ku saabsan kadeedka takoorka.

Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha (Equity and Civil Rights Office) ee OSPI wuxuu ka jawaabi doonaa su'aalaha ku saabsan xuquuqda iyo mas'uuliyadda hoos timaado sharciga xuquuqda madaniga iyo waxa aad samayn kartid si aad u xallid arrimaha ku saabsan takoorka ka jira dugsiga cunugaada. La soco in aan bixinin talada sharciga ama in aan u doodin cidna.

360-725-6162 | TTY 360-664-3631 | equity@k12.wa.us

La Hadal Iskuduwahaada u Hoggaansamida Xuquuqda Madaniga. Iskuday In Aad Xallid Arrinta.

Badanaa, wada hadalka lala yeesho maamulaha ama iskuduwaha u hoggaansamida xuquuqda aadanaha ee ku sugan dugsiga dagamada waa talaabada ugu fiican aad qaadi kartid si aad wax uga qabatid arrimahaada. Xubnahaan shaqaalaha waxay habsan karaan in cunugaada uu helo dhamaan barnaamijyada iyo adeegyada uu dugsigaada bixiyo.

¹ Cutubka 28A.642 RCW, <http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=28A.642>. Cutubka 28A.640 RCW, <http://apps.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=28A.640>. Cutubka 49.60 RCW, <http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=49.60>.



Xallinta Muranka

Habkaan **talaabada aan rasmiga ahayn** waxay arrintaada gaarsiin doontaa saraakiisha dugsiga iyo waxay u horseedi kartaa in dhakhso loo helo xal dhab oo waxtar leh.

- **Waxaad xoogga saartaa xaqiiqada** la xariirto takoorka iyo kadeedka, sida aad adiga fahamsan tahay, IYO
- U dhaaf in maamulaha ama iskuduwaha ogadaan **waxa aad dooneysid in iyaga sameyaan si loo xalliyo masalada**

Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga Waxay Ka Cayaaraan Kaalin Muhiim ah

Waxaan ku dhiiri gelineynaa qoysaska iyo shaqaalaha dagmada iyo dugsiga in ay si sokke u wada shaqeyaan si ay u xalliyaan qilaafaadkooda iyo arrimaha ku saabsan takoorka iyo kadeedka takoorka ka jira heerka hoose.

La xariir **iskuduwaha u hoggaansamida xuquuqda aadanaha** dagmadaada. Waxaad liiska xariirka ka heli kartaa bogga internetka Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga OSPI (OSPI'S Equity and Civil Rights), www.k12.wa.us/Equity/ContactList.aspx.

Soo gudbi Ashtakada Takoorka Ku Saleysan Dabaqadda la Badbaadiyo²

Qof kasta wuxuu soo gudbin karaa ashtako rasmi ah oo soo sheegta in takoor uu ka dhacay dugsiga dadweynaha Washington taasoo ku saleysan dabaqadda la badbaadiyo. *Qof kasta* wuxuu ka mid noqon karaa waalidiinta, ardayda, macalimiinta, maamuleyaasha, iyo u doodeyaasha.

Muhiim! Ashtakooyinka la xariiro waxbarashada khaaska ah, barnaamijyada waxbarashada federaalka, ama dabeecadda aan ku dhisneyn aqoonta uu ku kaco tananare ama macalin haysta shahaado, mid kasta wuxuu raaca hab u gaar ah. Hel macluumaad ku saabsan talooyinka ashtakada ku yaala bogga 5.

Waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad si wanaagsan u raacdid ashtakada. Haddii aad qabtid su'aalo, waxaad si toos ah u tagtaa dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto kaddibna weydiiso macluumaadka aad u baahan tahay in aad horay ugu socotid.

Talaabada 1aad. Qor Ashtakadaada

1. Sharax dabeecadda ama dhacdada. Isticmaal xaqiiqada: maxaa dhacay, yaa ka dambeyay, iyo goorta.
2. Sharax sababta aad u aaminsan tahay in takoor uu meesha ka dhacay.
3. Sharax talaabadaha aad aaminsan tahay in dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto qaado si uu u xalliyo masalada.

Soo dir ashtakadaada qoran—kuna soo dir boostada, faks, email, ama gacanta ku keen—adiga oo u soo dira agaasimaha dagmada, maamulaha dugsiga waalidka doorto, ama iskuduwaha u hoggaansamida xuquuqda aadanaha. OSPI waxay haysaa liiska bogagga internetka ee dhaamaan dugsiyada dagmada gobolka. Macluumaadka lagaala xariiro waxaa laga heli karaa bogaggaan, <http://www.k12.wa.us/Maps/SDmainmap.aspx>.

² WAC 392-190-065, <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=392-190-065>.



Xallinta Muranka

Taariikhda Ugu Dambayso ee la soo Gudbiyo Ashtakada

Dugsiyada dagmada iyo dugsiyada waalidka doortaan waxaa loo ogol yahay in ay qaataan taariikhda ugu dambayso ee la soo gudbiyo ashtakooyinka. Taariikhda ugu dambayso waa in

ay ahaato **ugu yaraan hal sanno** dhacdada kaddib ama dabecadda - qofka ay ku saabsan tahay ashtakada - ay dhacday. Ogaaw haddii dugsiyada dagmada ama dugsiyada waalidka doorto qabsado waqtiga ugu dambeeyo oo la soo gudbiyo ashtakada la xariirto takoorka.

Talaabada 2aad. Dugsiga Dagmada ama Dugsiga Waalidka Doorto

Ayaa Baara Ashtakadaada

Iskuduwaha xuquuqdaada madaniga wuxuu leeyahay kaalin muhiim ah marka dugsiyada dagmada ama dugsiyada waalidka doorto helo ashtakadaada qoran. Iskuduwaha waa in uu:

- Ku siiyo koobiga habka la raaco ashtakooyinka takoorka
- Hubsado in dhakhso loo qabto baaritaan tafatiran

Muhiim! Waqtigaan, waxaad go'aan ku gaari doontaa in aad dhakhso xallid ashtakadaada baddalkii aad ku sii socon lahayd baarista.

30 Maalmaha Jadwalka iyo Dheereynta Taariikhda Ugu Dambayso

Marka dagmada ama dugsiyada waalidka doorto helo ashtakadaada qoran, agaasimaha ama maamulaha waa in uu, qoraal ahaan, kuugu soo jawaabaan muddo **30 maalmaha jadwalka**— haddii aadan raali ku noqonin muddo ka duwan.

Haddii ashtakadaada ku lug leedahay **xaalado gaar ah** oo u baahan baaritaan dheer, dagmada ama dugsiyada waalidka doorto (charter school) waa in uu, qoraal ahaan, ku ogeysiyo kuuna sheego **(1)** sababta shaqaalaha u baahan yahiiin dheereyntaan waqtiga iyo **(2)** sababta loogu baahan yahay in la qabto taariikh cusub xagga jawaabtooda qoran.

Talaabada 3aad. Dugsiga Dagmada ama Dugsiga Waalidka Doorto

Wuxuu ka Jawaabaa Ashtakadaada

Jawaabteeda qoran, dagmada ama dugsiyada waalidka doorto waa in uu ku daro macluumaadkaan:

- Soo koobidda natiijadaha baarista
- Go'aanka si cad u sheega haddii dagmada ama dugsiyada waalidka doorto ku guul dareystay in uu u hoggaansamo sharciga xuquuqda madaniga ama haddii kale
- Ogeysiiska in aad racfaan ka qaadan kartid go'aankaan: sida iyo meesha loo gudbiyo racfaanka rasmiga, iyo cidda loo baahan yahay in ay ka hadasho
- Talaabo kasta, oo lagu gaaro baarista, loona baahan yahay si dugsiyada dagmada iyo dugsiyada waalidka doorto ugu hoggaansamaan sharciga xuquuqda madaniga

Talaabo kasta oo lagama maarmaan ah looguna talagalay in lagu saxo waa in la hirgeliyo muddo **30 maalmaha jadwalka** kaddib marka la helo jawaabtaan qoran - haddii aadan waafaqin muddo ka duwan.



Xallinta Muranka

Dhexdhexaadin

Dhexdhexaadinta waa fursad aad ka fakari kartid. Sida hoos timaado sharciga gobolka, dugsiyada dagmada iyo dugsiyada waalidka doorto waxay bixin karaan - kharashkana saaran yahay - fursadda ay u adeegsadaan dhexdhexaadiye aan dhana u eexan si ay u xalliyaan ashtakooyinka.³

Dhexdhexaadinta waa in ay ahaato wax ay iskooda u qaataan waalidiinta iyo ilaaliyeyaasha. Haddii aad go'aan ku gaartid in aad isticmaashid dhexdhexaadiye, waxaa suurto ah in la fidiyo muddada waqtiga 30ka maalin, halkaas ay dagmada ama dugsiyada waalidka doorto looga baahan yahay in ay ka jawaabaan ashtakadaada.

Muhiim! La soco in OSPI aysan ogolaanin, qaadanin, ama hirgelinin heshiisyada lagu gaaro dhexdhexaadinta.

Racfaan ka Qaado Go'aanka Ashtakadaada Takoorka⁴

Dugsiyada dagmada iyo dugsiyada waalidka doorto waa in ay qabaan habka ashtakada iyo waa in ay jirto fursadda racfaanka. Racfaanada waa in loo gudbiyo sarkaal ama guddi oo aan ku lug lahayn ashtakada.

Haddii aadan waafaqsaneyn go'aanka ku xiga baarista ashtakadaada ee dugsiyada dagmada ama dugsiyada waalidka doorto, waxaad soo **gudbin kartaa racfaan rasmi ah**. Waxaan kugu dhiiri gelineynaa in aad si wanaagsan ula socotid habka racfaanka. Haddii aad qabtid su'aalo, waxaad si toos ah u tagtaa dugsiyada dagmada ama dugsiyada waalidka doorto kaddibna weydiiso macluumaadka aad u baahan tahay in aad horay ugu socotid.

Muhiim! Macluumaadka ku saabsan habka racfaanka waa in lagu soo daro jawaabta qoran aad heshid kaddib marka dagmada ama dugsiyada waalidiinta doorato (charter school) dhamaystiro baaritaanka - *sida iyo meesha loo gudbiyo racfaanka rasmiga, iyo qofka loo baahan yahay in loo diro*.

Taariikhda Ugu Dambayso ee la Soo Gudbiyo Racfaanka

Dugsiyada dagmada iyo dugsiyada waalidka doorto waxaa loo ogol yahay in ay qaataan taariikhda ugu dambayso ee la soo gudbin karo racfaanada. Taariikhda ugu dambayso waa in aysan ka yaraanin **10 maalmaha jadwalka** laga bilaabo taariikhda aad heshid jawaabta qoran ilaa laga gaaro baarista ka dambaysay ashtakadaada rasmiga ah. Ogaaw haddii dugsiyada dagmadaada ama dugsiyada waalidka doorto qabsado waqtiga ugu dambeeyo oo la soo gudbiyo racfaanka la xariira ashtakada takoorka.

30 Maalmaha Jadwalka oo Looga Jawaabo Racfaankaada

Marka dugsiyada dagmada ama dugsiyada waalidka doorto helaan racfaankaada, agaasimaha ama maamulaha waa in ay, qoraal ahaan, kuu soo jawaabaan - muddo 30 maalmaha jadwalka gudahooda - haddii aadan adiga raali ku noqonin muddo ka duwan.

³ WAC 392-190-0751, <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=392-190-0751>.

⁴ WAC 392-190-070, <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=392-190-070>.



Takoorka, Kadeedka Takoorka, iyo Kadeedka Kacsiga

Xallinta Muranka

Muhiim! Go'aanka racfaanka waa in lagu daro sida loo gudbiyo ashtakada loogu gudbiyo OSPI. Haddii aadan raali ku noqonin go'aanka racfaanka, sharciga gobolka wuxuu bixiyaa fursad oo ashtako rasmi ah loogu gudbiyo OSPI.

Ashtakada Loo Gudbiyo OSPI Taasoo ku Saleysan Go'aanka Racfaanka⁵

Talaabada 1aad. Qor Kaddibna Soo Dir Ashtakadaada

Ashtakada Heerka-Gobolka Wuxuu Ka Dambeyaa Ashtakada Hoose iyo Habka Racfaanka

Tani waa ashtako gaar ah oo la qaban karo haddii **lala kulmo mid ka mid ah labadaan shardi: (1)** waxaad dhamaystirtay ashtakada rasmiga ah iyo habka racfaanka dugsiga dagmada ama dugsiga waalidiinta doorato, ama **(2)** dugsiga dagmada ama dugsiga waalidiinta doorato ayaan si sax ah u dabagelin habka ashtakada iyo racfaanka.

Hubso in aad ku soo dartid tafaasiishaan:

- Sharax dabeecadda ama dhacdada. Istimaal xaqiiqada: maxaa, yaa iyo goorma
- Sharax sababta aad u aaminsan tahay in takoor uu meesha ka dhacay
- Ku dar magacaada iyo macluumaadka lagaala xariiro - kana mid ah cinwaanka boostada
- Ku dar magaca iyo cinwaanka dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto aad uga hadashid ashtakadaada
- Waxaad soo raacisaa koobiga go'aanka laga gaaray ashtakada iyo go'aanka racfaanka laga soo qaaday dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto
- Sharax talaabadaha aad aaminsan tahay in dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto qaado si uu u xalliyo masalada

Haddii ashtakadaada la xariirto arday khaas ah, hubso in aad ku dartid **(1)** magaca iyo cinwaanka ardayga, iyo **(2)** dugsiga iyo dugsiga dagmada, ama dugsiga waalidka doorto, uu ardayga tago.

Waxaad ashtakadaada oo qoran u dirtaa Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga (Equity and Civil Rights Office) ee laga helo Xafiiska Maamulaha Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction).

Email: Equity@k12.wa.us | **Faks:** 360-664-2967

Ku dir boostada ama gacanta lagu geeyo:

Equity and Civil Rights Office, Office of Superintendent of Public Instruction
PO Box 47200, 600 Washington St. S.E., Olympia, WA 98504-7200

Taariikhda Ugu Dambeyso Ashtakada Loo Gudbiyo OSPI

Waxaad haysataa **20 maalmaha jadwalka** oo aad ashtako ugu gudbisid OSPI laga bilaabo maalinta aad go'aanka racfaanka ka heshid dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto - haddii OSPI aysan dheereynin taariikhda ugu dambayso taasoo ku saleysan daruufaha.

⁵ WAC 392-190-075, <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=392-190-065>.



Takoorka, Kadeedka Takoorka, iyo Kadeedka Kacsiga

Xallinta Muranka

Talaabada 2aad. OSPI Waxay ka Jawaabtaa Ashtakadaada

Shaqaalaha jooga OSPI waxay fiirin doonaan ashtakadaada kaddibna waxay gaari doonaan go'aan ku saabsan haddii loo baahan yahay in la bilaabo baaritaan. Haddii shaqaalaha OSPI go'aansadaan in ay baaraan ashtakadaada, waxay kuu soo diri doonaan ogeysiis qoran oo sharaxa go'aanka dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto.

Muhiim! Waqtigaan, waxaad go'aan ku gaari doontaa in aad dhakhso xallisiid ashtakadaada baddalkii aad ku sii socon lahayd baarista.

OSPI ma baari doonto haddii ashtakadaada:

- Aysan dhamaystirneen ama timaado taariikhda 20ka maalin jadwalka kaddib
- Aysan ku dacwoonin jebinta sharciga xuquuqda madaniga ay OSPI hirgeliso. La xariira Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga (Equity and Civil Rights Office) si aad u heshid macluumaadkaan: 360-725-6162 | equity@k12.wa.us
- Marka aan la ogeysiinin dugsiga dagmada ama dugsiga waalidka doorto lana isticmaalin habka ashtakada hoose iyo habka racfaanka.
- Marka uu baaro gobol kale, federaalka, ama wakaaladda xuquuqda aadanaha halkaas ay OSPI filaneyso in laga gaaro xal la mid ah.

Haddii shaqaalaha OSPI go'aansadaan in aysan baarin ashtakadaada, OSPI waxay kuu soo diri doontaa ogeysiis qoran oo sharaxa go'aankaan.

Kaddib marka la dhamaystiro baarista, OSPI waxay kuu soo diri doontaa go'aan qoran oo:

1. Ka hadlaa eedeyn kasta oo ku jirta ashtakada, iyo
2. Tafaasiisha falalka saxidda ee loo baahan yahay si loo saxo u hoggaansami la'aanta.

Ashtakooyinka iyo Dacwadaha la Xariira

Ashtakada la xariirto ama dawadda waxay saamayn kartaa xalka ashtakadaada. Dugsiga dagmada, ama OSPI, wuxuu go'aan ku gaari doonaa in uu sugo ilaa laga xalliyo ashtakada hore ama aan go'aan kama dambays ah laga gaarin dacwadda ka hor inta shaqaalaha aysan, qoraal ahaan, jawaab ka bixinin ashtakadaadii ugu dambaysay.

Fursadaha Ashtakada Takoorka ee Kale

Xafiiska Xuquuqda Madaniga **Office for Civil Rights (OCR), U.S.** Waaxda Waxbarashada OCR waxay xoojisaa dhowr sharciyada xuquuqda madaniga, ee mamnuuca takoorka ka jira dugsiyada dadweynaha kuna saleysan isirka, midabka, asal qaran, kacsi, itaal darri, iyo da'. Soo gudbi ashtakooyinka soona raaci OCR muddo 180 maalmaha jadwalka laga bilaabo taariikhda lala kulmay takoorka la soo sheegay.

206-607-1600 | TDD: 1-800-877-8339 | OCR.Seattle@ed.gov | www.ed.gov/ocr



Takoorka, Kadeedka Takoorka, iyo Kadeedka Kacsiga Xallinta Muranka

Guddiga Xuquuqda Aadanaha Gobolka Washington (Washington State Human Rights Commission) (WSHRC)

WSHRC waxay hirgelisaa Sharciga Washington ee ka soo Horjeeda Takoorka (Washington Law Against Discrimination) (RCW 49.60), kaasoo mamnuuca takoorka xagga shaqada iyo meelaha loo fududeeyo dadweynaha, kana mid ah dugsiyada. Waxaad ashtakooyinka u soo gudbisaa WSHRC muddo lex bil gudahooda laga bilaabo taariikhda takoorka la soo sheegay.

1-800-233-3247 | TTY: 1-800-300-7525 | www.hum.wa.gov

U.S. Waaxda Cadaaladda (Department of Justice) (DOJ), Qeybta Fursadaha Waxbarashada (Educational Opportunities Section)

DOJ waxay hirgelisaa sharciyada xuquuqda madaniga federaalka ee dugsiyada dadweynaha ka mamnuuca takoorka ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, kacsiga, itaal darrida, iyo diinta.

1-877-292-3804 | TTY: 202-514-0716 | education@usdoj.gov | www.justice.gov/crt/about/edu/

Ashtakooyinka la Xariira Waxbarashada khaaska ah, Macalimiinta, iyo Barnaamijyada Federaalka

Fursadaha Xallinta Muranka Waxbarashada khaaska ah

Haddii aad aaminsan tahay in dugsiyada dagmada ku fashalay in uu bixiyo adeeg lagu aqoonsaday Barnaamijka Waxbarashada Ku Kooban Qofka (Individualized Education Program) (IEP), u diiday ardaygaada in uu qaato waxbarashada dadweynaha ku habboon, ama uusan la kulmin sharuudaha kale ee gobolka ama federaalka ee la xariira waxbarashada khaaska ah, waxaad soo gudbin kartaa ashtako rasmi ah ama waxaad codsan kartaa dhageysiga marinta sharciga.

360-725-6075 | TTY: 360-586-0126 | www.k12.wa.us/SpecialEd/Families/Complaints.aspx

Ashtakooyinka ku saabsan Macalimiinta iyo Tababareyaasha Haysta Shahaadada

Waxaad adeegsan kartaa hab ashtako gaar ah habka ashtakada eedeynta in shaqaale haysta shahaado uu ku kacay ficil aan aqoon ku dhisneyn ama waxaa ka maqan sifada asluubta wanaagsan ama isku filaashada qofka.

360-725-6130 | TTY: 360-664-3631 | opp@k12.wa.us | www.k12.wa.us/ProfPractices

Ashtakada Muwaadinka Barnaamijyada Federaalka (Federal Programs Citizen Complaint)

Eedaha waxaa lagu dabaqaa habka ashtakada khaaska ah in dugsiyada dagmada ama OSPI jebisay sharciga gobolka ama federaalka ama xeer lagu dabaqo barnaamij uu leeyahay federaalka sida hoos timaada Sharciga Waxbarashada Hoose iyo Sare (Elementary and Secondary Education Act).

360-725-6100 | TTY: 360-664-3631 | www.k12.wa.us/TitleI/CitizenComplaint.aspx



Takoorka, Kadeedka Takoorka, iyo Kadeedka Kacsiga Xallinta Muranka

Ka baro in badan. Weydii su'aalo. Raadso kaalmo.

**Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga (Equity and Civil Rights Office) ee
Xafiiska Agaasimaha Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of
Public Instruction)**

360-725-6162 | TTY: 360-664-3631 | equity@k12.wa.us | www.k12.wa.us/equity

**Si aad u heshid Iskuduwaha u Hoggaansamida Xuquuqda Madaniga (Civil Rights
Compliance Coordinator) ee ku yaal dagmadaada, booqo:**

www.k12.wa.us/Equity/ContactList.aspx

Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan takoorka iyo kadeedka, tilmaamaha siyaasadda
dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariiro, ka heli kartaa www.k12.wa.us/Equity.

Warqadaan waxay soo taxday xuquuqda iyo mas'uuliyadda sida hoos timaado sharciyada xuquuqda madaniga gobolka iyo federaalka. Waxaa dhici karto in aad yeelatid xuquuq dheeraad ah sida hoos timaado sharciyada kale. Ujeedada macluumaadkaan waa wargelin oo keliya - ma ay bixinayaan tallo sharci ah. Wixii talooyin sharciga oo u qaasa daruufaa xaalada shakhsinimo, fadlan kala xariir qareen.

OSPI ayaa u siisa marin siman dhamaan barnaamijyada iyo adeegyada iyada oo aan ku saleysnayn dheddig/lab ahaan, sinji, caqiido, diin, midab, asal waddan, da'da, kuwa si sharaf leh looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada, Dookh Isku-tag, oo ka mid yihiin muujinta ama isku-aragga lab/dheddig, jiritaan kasta oo naafanimo dareen dhimir ama jirka ah, ama isticmaalka hage ey tababbaran ama u adeegga xayawaanka ee qofka naafanim,ada qaba. Su'aalaha iyo cabashooyinka takoorka la sheeganayo ayaa lagu hagaajin karaa the Equity and Civil Rights Director, (360) 725-6162 or P.O. Box 47200; Olympia, WA 98504.

